

Xuquuqda Ardayda

Jaadka iyo Aqoonsiga Jaadka Qofka

Sharchiyada xuquuqda madaniga waxay mamnuuceen takoorka iyo kadeedka takoorka ku saleysan sheegidda jaadka qofka iyo aqoonsiga jaadka qofka xagga dugsiyada dadweynaha K-12.

Takoorka waa caddaalad darrada ama sinaan la'aanta ama kadeedka loo geysto qof ama koox maxaa yeelay waxay qeyb ka yahiin koox sifeysan, oo loo yaqaan dabaqadda la badbaadiyo.

Sheegidda jaadka qofka ama aqoonsiga jaadka qofka waa dabaqaadka la badbaadiyosida hoos timaado sharciga Gobolka Washington.¹

Kadeedka takoorka waa kadeedka ku saleysan **dabaqadda la badbaadiyo**. Waxay qaadan kartaa qaabab badan, sida cago jugleynta, caayda, kaftanka yasniinka, weerarka, ama dabeeecad kale sida cago jugelynta, waxyeelada, ama yasniinka.

Erayada Caadiga iyo Sifeynta

Dadka waxay isticmaalaan erayo kala duwan oo lagu sharaxo waayaha ay kala kulmaan jaadka ay yahiin. Erayada waa isbaddali karaan, taasoo ku saleysan gobolka, luqadda, da'da, hiddaha, iyo qodobo kale.

Halkaan waxaad ka heli doontaa qaar ka mid ah erayada badanaa la isticmaalo:

Sheegidda Jaadka Qofka waxay sharaxdaa siyaabaha uu qofka u sheego jaadka uu yahay. Dabeeecadda, caatifadda, aadaabta, labbiska, dabeeecadda isqurxinta, danaha, iyo hawlaha waa qaar ka mid ah siyaabaha dadka u sheegaan jaadka uu yahay.

Aqoonsiga jaadka qofka waxay tixraacdha dareen ka soo baxa gudaha qofka in ay tahay dumar, ama rag, ama labadaba, ama midna - iyadoo aan la fiirinin jaadka la siiyay waqtiga dhallashada.

Qofka Aan Jaadna Raacsaneyn waxay sharaxadaa qofka jaadkiisa ka duwan tahay waxa laga filaayo, sida loo baahan yahay in uu u ekaado ama u dhaqmo taasoo ku saleysan jaadka qofka la siiyay waqtiga dhallashada. Dadka isu aqoonsada in ay ka baxsan yahiin kooxaha jaadka hiddaha ama isu aqoonsada in ay yahiin labada jaad ama in ay dhexdhexaad ka yahiin jaadka qofka waa tusaalooyin ku saabsan qofka aan ahayn jaadka.

Kacsiga Nafleyda/Kacsiga waxay tixraacaan dhismaha jirka gudaha iyo dibadda qofka, kromosoomka, iyo hormonaadka.

Nimo-naageesh waa eray guud oo badanaa loo adeegsado in lagu sharaxo qof aqoonsigiisa jaadka uu yahay ama waxa uu soo jeediyo, ama labadaba, ka duwan yahiin kuwa hiddo ahaan la xariira jaadka la siiyo waqtiga dhallashada.

Wareegidda waxaa loola jeedaa habka uu qofka ka wareego nolosha iyo aqoonsiga hal jaad ilaa nolosha iyo aqoonsiga mid kale.

Magacyada la Jecel Yahay, Magac u Yaalada Qofka, iyo Diiwaanka Dugsiga

Magaca La Jecel Yahay, Magac u Yaalka. Ardayda tagta dugsiyada dadweynaha Washington waxay xaq u leeyahiin in loogu yeero magaca ay jecel yahiin iyo magac u yaalada qofka - *he* and *him*, ama *she* iyo *her*. Dugsiyada waa in aysan dalbanin in la baddalo magac sharci ah ay shaqaalaha u isticmaalaan magaca uu

¹ Cutubka 28A.642 RCW, <http://app.leg.wa.gov/rcw/default.aspx?cite=28A.642>. Cutubka 49.60 RCW, <http://app.leg.wa.gov/rcw/default.aspx?cite=49.60>. Cutubka 392-190 WAC, <http://app.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=392-190>.



Xuquuqda Ardayda

Jaadka iyo Aqoonsiga Jaadka Qofka

jecel yahay ardayga. Inta uu socdo fasalka, xagga jaantusyada kuraasta, waqtiga loo yeero, imtixanaadka iyo hawlaho loo diro, iyo diiwaanada kale ee dugsiga, shaqaalaha waa in ay isticmaalaan magaca uu jecel yahay ardayga iyo magac u yaalka jaadka uu yahay.

Diiwaanka Dugsiga. Diiwaanka waayaha waxbarashada ardayga K–12 wuxuu ka koobaan yaahay labo nooc oo warqado ah; mid kasta wuxuu u baahan yahay jawaab ka duwan tan dugsiyada la xariira sheegidda jaadka qofka iyo aqoonsiga jaadka qofka.

Diiwaanka aan rasmiga ahayn ee qoraal ka reeba waxbarashada ardayga waxay ardayga ku tixraacaan magaca uu jecel yahay iyo jaadka uu yahay. Tusaale ahaan, kaararka aqoonsiga dugsiga, oo aan ahayn warqadaha sharciga, waa in ay muujiyaan magaca uu ardayga jecel yahay.

Diiwaanka waxbarashada rasmiga ah ee waajibka ah sida sharciga uu rabo wuxuu dugsiga ka codsan kaaraa in uu isticmaalo magaca sharciga ardayga iyo jaadka uu yahay. Tusaale ahaan, warqadaha la xariira baarista gobolka waa in ay soo sheegaan magaca sharciga ardayga. Dugsiyada waa in ay baddalaan magaca ardayga ee ku qoran diiwaanka dugsiga rasmiga ah haddii ardayga soo saaro warqado muujiya baddalaadha mgaca sharciga. Dugsiyada waa in ay baddalaan jaadka lagu tilmaamay ardayga haddii waalidka ama ardayga codsado baddalka.

Diiwaanka dugsiyada dadweynaha waa in ay isticmaalaan magaca ardayga jecel yahay iyo jaadka la siiyay haddii aysan jirin sabab sharci ah oo aan sidaas loo sameynin.

Heerka Labbiska iyo Jaadka Qofka

Labbiska iyo habka tinta waa labo siyaabo ay ardayda badanaa ku soo jeediyaan jaadka ay yahiin. Ardayda waxay xaq u leeyahiin in ay sheegaan jaadka ay yahiin inta ay ku sugan yahiin dugsiga - sida uu rabo xeerka labbiska dugsiga - takoor iyo kadeed la'aan. Heerka labbiska dugsiga waa in uu ahaado mid dhedhexaad ka ah jaadka qofka iyo waa in uusan soo koobin xulashada labbiska ardayga taasoo ku saleysan jaadka qofka.

Musqulada iyo Qolalka Lokarada

Musqulada. Dugsiyada dadweynaha waa in ay ardayda u ogoladaan in ay isticmaalaan musqusha waafaqsan aqoonsiga jaadka qofka. Arday kasta - ha ahaado nimow naageesh ama yuusan ahaanin - ee codsada asturnaan weyn, sabab kasta ha ahaato, waa in la siyo fursad uu ku tago musqul kale, sida musqusha shaqaalaha ama musqusha xafiiska caafimaadka. Hase ahatee, shaqaalaha dugsiga kama dalban karaan ardayga in uu isticmaalo musqul gaar ah maxaa yeelay xaaladda ardayga waa nimo-naageesha ama jaad aan waafaqsaneyn.

Qolalka Sanaadiiqda. Dugsiyada dadweynaha waa in laga helo qolka sanaaqiiqda, taasoo waafaqsan aqoonsiga jaadka ardayga haddii xaaladda aysan doonin in la badbaadiyo asturnanta ardayga. Baddalaadha jadwalka ama isticmaalka meel gaar ah, sida musqul dhaw oo albaab leh ama meel lagu kala gooyay daah, waa siyaabaha dugsiyada dadweynaha u badbaadiyaan asturnanta jirka.

Dugsiyada waa in ay go'aan ka gaaraan sida ardayga u isticmaalo sanduuqyada qolalka hadba sida kiisku yahay. Ujeedooyinka waxay yahiin in lagu badiyo isdhexgalka bulshada iyo in la siyo sinaanta fursadda looga qeybgalo fasalada waxbarashada iyo fursadaha jimicsiga.

Isboortiga iyo Fasalada Aqoonta Jimicsiga



Xuquuqda Ardayda

Jaadka iyo Aqoonsiga Jaadka Qofka

Dugsiyada waa in ay ardayda u ogoladaan in ay ka qeybgalaan jimicsiga jirka iyo cayaaraha waafaqsan aqoonsiga jaadka qofka.

Xaq u yeelashada cayaaraha jimicsiga ee ka dhexeyyo dugsiyada waxaa go'aan ka gaara Ururka Hawalahaa Ka Dhixeyyo Dugsiyada Washington (Washington Interscholastic Activities Association) (WIAA), www.wiaa.com. Ardayda waa in la xariiraan WIAA ama fiiriyaan **Siyaasadda Ka-Qeybgalka Aqoonsiga Jaadka Qofka (Gender Identity Participation Policy)** ee laga helo qeybta xaq u yeelashada Buugga WIAA (WIAA Handbook), www.wiaa.com/subcontent.aspx?SecID=350.

Macluumaadka Sirta Waxbarashada iyo Caafimaadka

Sharciyada asturnaanta waxay badbaadiyaan ammaanka iyo fiyoobida ardayga. Xaqaan loo leeyahay asturnaanta waxaa badbaadiya sharciyada gobolka iyo federaalka, sida Sharciga Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Asturnaanta (Family Education Rights and Privacy Act) (FERPA).²

Shaqaalaha dugsiga waxay qeybsan karaan oo keliya macluumaadka waxbarashada asturan iyo macluumaadka caafimaadka. Guud ahaan, shaqaalaha dugsiga waa in aysan xaaladda nimownaageeshnimada ama aan dhinacna raacin, magaca sharciga, ama loo sheegay waxa uu yahay waqtiga dhalashada, waxaana ku jiri kara arday kale, shaqaalaha dugsiga, iyo shaqaalaha aan dugsiga ka tirsaneyn.

Kadeedka Takoorka

Kadeedka ku saleysan sheegidda jaadka qofka ama aqoonsiga jaadka qofka waa qaab takoor laga mamnuucay dugsiyada Washington. Dugsiyada waa in ay qaadaan talaabooyin oo ardayda looga badbaadiyo kadeedka takoorka.

Shaqaalaha dugsiga waa in ay baaraan kadeedka takoorka suurtogalka ah - isla marka ay ogadaan, ama ay ogaan karaan - xattaa haddii waalidka ama ardayga uusan soo gudbinin ashtako rasmi ah. Haddii baaritaanka muujiyo in dabeeecadda kadeedka abuuray jawi ku dhisan cadaawad, shaqaalaha waa in ay dhakhso joojiyaan dabeeecadda iyo soo af jaraan jawiga ku dhisan cadaawadda.

Dugsiga waa in uu:

1. Wax ka qabto waxyeelada kadeedka takoorka ku yeeshay ardayga inta uu ku sugnaa dugsiga, IYO
2. Hubsado in dabeeecadda takoorka aysan mar kale dhicin.

Ka fiiri macluumaad dheeraada oo ku saabsan kadeedka takoorka, tilmaamaha siyaasadda dagmada iyo dhaqanka, iyo ilaha la xariira, www.k12.wa.us/Equity.

Xallinta Dhibatooyinka ama Qilaafaadka

Wada hadalka lala yeesho maamulaha dugsiga, ama iskuduuhaha u hoggaansamida xuquuqda madaniga ee dugsiga dagmada, badanaa waa talaabada kowaad oo looga hadlo arrimahaada ama qilaafaadkaada ku saabsan takoorka, iyo xalka dhibaatada.

- **Ahamiyadda sii xaqiqiada** la xariirta takoorka iyo kadeedka, sida aad u fahamsan tahay, IYO

²Family Educational Rights and Privacy (FERPA), 20 U.S.C. §1232; 34 C.F.R. Qeybta 99, http://www.ecfr.gov/cgi-bin/text-idx?tpl=/ecfrbrowse/Title34/34cfr99_main_02.tpl.



Xuquuqda Ardayda

Jaadka iyo Aqoonsiga Jaadka Qofka

- Ogeysii maamulaha ama iskuduwaha **waxa aad rabtid in ay sameyaan si ay u xalliyaaan dhibaatadaas**

Waxaad macluumaadka lagala xariiro iskuduwaha u hoggaansamida xuquuqda madaniga ka heli kartaa halkaan, www.k12.wa.us/Equity/ContactList.aspx. Waxaad kaloo fursad u haysataa in aad soo gudbisid ashtako rasmi ah.

Ashtakooyinka Rasmiga - Takoorka iyo Kadeedka Takoorka

Haddii ay kula tahay in cunugaada uu la kulmo takoor ama kadeedka takoorka, waxaad soo gudbin kartaa ashtako rasmi ah.

- Bogga Sinaanta iyo Xuquuqda Madaniga, www.k12.wa.us/Equity/Families, waxaad ka heli doontaa macluumaad ku saabsan sida loo gudbiyo ashtako rasmi ah iyo sida loo raaco talaabadaha.
- Kala xariir U.S. Waaxda Waxbarashada (Department of Education), Xafiiska Xuquuqda Aadanaha (Office for Civil Rights), telefoonka 206-607-1600 (TDD: 1-800-877-8339), ama booqo bogga internetka, www.ed.gov/ocr.
- Kala xariir Guddiga Xuquuqda Aadanaha Gobolka Washington (Washington State Human Rights Commission), telefoonka 1-800-233-3247 (TTY: 1-800-300-7525), ama booqo bogga internetka, www.hum.wa.gov.

Ka baro in badan. Weydii su'aalo. Raadso kaalmo.

Xafiiska Sinaanta iyo Xuquuqda Madaniga (Equity and Civil Rights Office) ee Xafiiska Agaasimaha Waxbarashada Dadweynaha (Office of Superintendent of Public Instruction)
360-725-6162 | TTY: 360-664-3631 | equity@k12.wa.us | www.k12.wa.us/equity

Si aad u heshid Iskuduwaha u Hoggaansamida Xuquuqda Madaniga (Civil Rights Compliance Coordinator) ee ku yaal dagmadaada, booqo: www.k12.wa.us/Equity/ContactList.aspx

Waxaad macluumaad badan oo ku saabsan takoorka iyo kadeedka, tilmaamaha siyaasadda dagmada iyo dhaqanka, iyo ilaha la xariiro, ka heli kartaa www.k12.wa.us/Equity.



Xuquuqda Ardayda

Jaadka iyo Aqoonsiga Jaadka Qofka

Warqadaan waxay soo taxday xuquuqda iyo mas'uuliyyadda sida hoos timaado sharciyada xuquuqda madaniga gobolka iyo federaalka. Waxaa dhici karto inaad yeelatid xuquuq dheeraad ah sida hoos timaado sharciyada kale. Ujeedada macluumaadkaan waa wargelin oo keliya - ma ay bixinayaan tallo sharci ah. Wixii talooyin sharciga oo u qaasa daruultaada xaalada shahsinimo, fadlan kala xariir qareen.

OSPI ayaa u siisa marin siman dhamaan barnaamijiyada iyo adeegyada iyada oo aan ku saleysnayn dheddig/lab ahaan, sinji, caqiido, diin, midab, asal waddan, da'da, kuwa si sharaf leh looga sii daayay ciidamada ama heerka ciidamada, Dookh Isku-tag, oo ka mid yihiiin muujinta ama isku-aragga lab/dheddig, jiritaan kasta oo naafanimo dareen dhimir ama jirka ah, ama isticmaalka hage ey tababbaran ama u adeegga xayawaanka ee qofka naafanim,ada qaba. Su'aalaha iyo cabashooyinka taakoorka la sheeganayo ayaa lagu hagaajin karaa the Equity and Civil Rights Director, (360) 725-6162 or P.O. Box 47200; Olympia, WA 98504.

